Somaliska

Faktablad för arbetssökande –
Taageero till hirgelinta dhaqdhaqaaq ganacsi

2017-01

Taageerada hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsashada

Qofka adigoo kale ah oo shaqo-doone ah, oona leh fursadaha hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsasho, wuxuu xaaladaha qaarkood heli kara caawinaad xiriir la leh hirgelinta ganacsashada. Barnaamijka waxaa loo yaqaanna *start av näringsverksamhet,* taageero till hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsashada, kaasoo ku suurtagelin doono in biloowga dhaqdhaqaaqa aad hesho kaalmo-dhaqaaleed aad isku biilato.

Ma lay siin kara taageerada hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsashada?

Gacanhaayeha Xafiiska shaqada ku qaabilsan ayaa marka hore ku dhaqaaqi doono, qiimaynta fursadaha aad shaqo helida u leedahay. Qiimaynta gacanhaayeha Xafiiska shaqada waxay ku salaysan tahay khibradahaaga iyo laamaha xirfadaha ee aad shaqada ka raadsanayso, iyadoo la tixgeliyo xaalad-dhaqaaleedka markaas jirta. Teeda kale, waa inaad leedahay fursado wanaagsan oo aad shirkad ku maamusho, taasoo lagu tijaabin doono qorshaha ganacsashada. Qorshaha noocaas waa in la sameeya kahor oggolaanshada barnaamijka. Taasoo macneheeda tahay in dhaqdhaqaaqa ganacsiyeed aad ka hesho faa'iidooyin macne leh iyo isku mashquulin joogto ah.

Da'da codsadeha waa in ay ka hoosayn 18 sano. Tan kale waa in uu shaqo-dooneha ahaan iska diiwan geliyay Xafiiska Shaqada.

Qofka rabo in u ka qaybgalo barnaamijka taageero-siinta hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsashada, wuxuu xaaladaha qaarkood heli kara fursad tababar . Taasoo u suurtagelin doonto helida korarshada khibrada laan ganacsiyeed gaar ah, taasoo ganacsigiisa ka hirgelin doono. Teeda kale, waxaa la siin doona fursad ugu qaybgalo tababar ku salaysan u diyaargarowga laguna bari doona xeerarka hirgalay ee u degsan shirkadaha, waa haddii qofku u weligiisa shirkad yeelan.

Waxaab muhim ah in shirkadda la hirgelin, kahor intii usan gacanhaayeha Xafiiska shaqada oggolaan barnaamijka taageero hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsasha. Haddii qofku kahor shirkadiisa u hirgeliyo waxaa suurtagal noqon karto in taageerada noocaas ah loo diido.

Af 00008_1.1_(2016-08-02, AF2000)

Kaalmo-dhaqaaleed miyaa la bixiya?

Qofka ka qaybgalaayo barnaamijka hirgelinta shirkadda, waxaa la siin kara gunnada dhaqdhaqaaqa [aktivitetsersättning] ama Gunnada ka qaybgaleyaasha [utvecklingsersättning]. Khasnadda caymiska bulshada [Försäkringskassan] ayaa lacagaha xisaabiso, go'aan ka gaarto oona bixisa. Warbixin dheeraad waxaad ka aqrisan karta qoraal-wabixineedka [Aktivitetsstöd iyo utvecklingsersättning] ee shabakadda internetka forsakringskassan.se.

Mudada kaalmo-dhaqaaleedka la bixiyo intee ayay la eg tahay?

Mudada kaalmo-dhaqaaleedka la bixiyo ugu badnaantii waa lex bilood. Xaaladaha qaarkood waa la kordhin kara, waa haddii qofku u xannuunsado ama ruqsad dowladeed ka soo daahdo.

Codsadeha caymis ma leeyahay?

Qofka qaata kaalmo-dhaqaaleedka loo yaqaanno [aktivitetsstöd] caymis ma laha. Sidaasoo kale, qofka ka qaybgalo barnaamijka taageerada hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsashada ee ku salaysan [jobb- iyo utvecklingsgarantin] ama [jobbgarantin för ungdomar] ma laha caymis. Waa in qofka u iskiisa u hubsada in uu caymis leeyahay.

Sidee xilka loo qaybsaday?

Qofkii u baahan warbixin dheeraad ku saabsan taageerada hirgelinta dhaqdhaqaaq ganacsasiyeed wuxuu la xiriiri kara Xafiiska Shaqada. Waxaa muhim ah in qofku u kahor si fiican, ugu fiirsaday fikrada ganacsashada. Taasoo u suurtagelin doonto in hawlwadeneyada Xafiiska Shaqada u wargeliyo qorshaha ganacsashada iyo kharashyada. Xafiiska Shaqada isagoo kaashanaayo aqoonyahannada dhaqaalaha ayay ku dhaqaaqi doonta, qiimaynta fursadaha u qofku u leeyahay dhaqdhaqaaqa ganacsashada iyo haddii uu buuxinaayo shuruudaha kale.

Qofku caawinaad dheeraad ma heli kara?

Asaasida shirkadaha ma aha arrin sahlan, waxay u baahan tahay aqoon iyo in qofku u diyaar u yahay halisteeda. Qofku wuxuu dhaqdhaqaaqa kahor iyo biloowga ba Xafiiska Shaqada ka heli karaa talo iyo naseexooyin. Goobaha qaarkood waxaa laga hela kulamada warbixinada iyo koorsooyinka xiriirka la leh hirgelinta dhaqdhaqaaqa ganacsashada. Waxaa kalo jira goobo kale ee qofka ku talo jiro dhaqdhaqaaq ganacsi, ka heli karo taageero iyo talobixin, tusaale:

Verksamt.se. Waa shabakadda internetka ee qabanqaabiyeen hay'adaha [Bolagsverket, Skatteverket iyo Tillväxtverket] loogu talagalay qofka rabo in u hirgeliyo dhaqdhaqaaqa ganacsi, wuxuu halkaas ka aqrisan kara warbixin ururs an. Qofku wuxuu ka qaybgeli kara maalmaha hirgelinta shirkadaha, samaysan kara qorshaha ganacsashada oona halkaas ka diiwan gelin kara dhaqdhaqaaqa ganacsashada. www.verksamt.se.

ALMI Företagspartner. Qofka ku talo jiro in uu shirkad dhisto ama dhowaan dhistay wuxuu boggan ka heli kara caawinaad. Gobol kasta ayaa laga hela. www.almi.se.

Enterprise Europe Network. Waxaa laga hela caawinaad ku saabsan suuqa Is-bahaysiga dalalka Yurub ama suuqa dalalka Yurub. www.euroinfo.se, 020-93 10 10.

Insamlingsstiftelsen IFS Rådgivningscentrum. Waxaa halkaan laga hela caawinaad gaar ahaan loogu talagalay dadyoowga aan dalka Iswiidan ku dhalan oo ku talo jiro in aan shirkad dhisadaan. Waxaa laga hela talo-bixin oo luqado kala duwan ah oo lacag la´aan ah. Dhowr kamid ah xarumaha talo-bixinta ayaa dalka ka hawlgala. www.ifs.a.se, 08-693 99 45.

NyföretagsCentrum. Talo-bixin iyo caawinaad lacag la'aan ah. Dadyoowga Nyföretagscentrum waa shabakad xiriiriyeyaal iyo shirkado oo qofka ku talo jiro in u shirkad dhisto ka heli karo talo aqoon heer sare ku salaysan. 100-laalo degmo ayaa laga hela. www.nyforetagarcentrum.se.

Coompanion – Kooperativ utveckling. Waxay talo siiyaan dadyoowga rabo in wadajir u hirgeliyaan fikradahooda. Gobol kasta ayaa laga hela. www.coompanion.se, 08-702 54 43.

Xiriiriyeyaasha kale. Tusaale: bangiyada, xoghaayeha arrimaha ganacsiga ee dowladaha hoose iyo ururrada.

Nidaamyada

Xeer-maamuleed (2000:634) ku saabsan barnaamijka siyaasadda suuqa shaqada
Xeer-maamuleed (1996:1100) ku saabsan Kaalmo-dhaqaaleedka dhaqdhaqaaqa shaqada
Xeer-maamuleed (2007:414) ku saabsan damaanada shaqada iyo horumarka
Xeer-maamuleed (2007:813) ku saabsan damaanada shaqada ee dhallinyarada

Nagala soo xiriir 0771-416 416 haddii arrintaan aad xiisaynayso ama aad doonayso warbixin dheeraad ah. Waxaad kaloo booqan kartaa Xafiiska shaqada kugu dhow ama shabakadda internetka arbetsformedlingen.se.